Ontario

**NEWS**

**Ministry of Labour**

# Casriyeysiinta Sharciyada Shaqada ee Ontario si loo Abuuro Fursad iyo Caddaalad: Qaanuunka Shaqooyinka Wanaagsan, Goobaha shaqada ee Cadaaladda ah, (The Fair Workplaces, Better Jobs Act,) 2017

22ka Nofeembar, 2017 12:00 P.M.

Hay'adda sharci dejinta Ontario waxay ansixisay Qaanuunka Shaqooyinka Wanaagsan, Goobaha shaqada ee Cadaaladda ah, (Fair Workplaces, Better Jobs Act,) 2017. Sharciga cusub waxaa ka mid ah wax-ka-beddelid baddan oo kala duwan oo lagu sameynayo Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta Ontario, (Employment Standards Act) ee sannadka 2000 iyo Qaanuunka Xiriirada Shaqada, (Labour Relations Act) ee sannadka 1995 iyo Qaanuunka Ammaanka iyo Caafimaadka Shaqada (Occupational Health and Safety Act).

Iyadoo dhaqaalaha gobolku uu yahay mid xoogan oo sii kobcaya, qaabka shaqadu way isbedeshay, midaas oo ka dhigtay in badan oo shaqaalaha ahi in ay ku rafaadaan taakulaynta qoysaskooda ay ku taakulaynayaan shaqada maalinta-barkeeda ah, qandaraas ama shaqada mushaharka ugu yar.

Shaqaalaha jooga Ontario waxay xaq u leeyihiin in ay helaan ilaalin xoogan oo lagu ilaaliyo meesha shaqada. Caddaalad iyo hufnaan waa in ay sii ahaadaan qiimooyinka tilmaamaya meelaha aynu ka shaqayno. Isbedeladan sharciga waxay abuuri doonaan fursado badan iyo ammaan ay helaan shaqaalaha ku nool guud ahaan gobolkeena.

## Kordhinta Mushaharka Ugu Yar

Ontario waxay kordhinaysaa heerarkeeda mushaharka ugu yar - guud ahaan, heerka ugu yar ee ay siin karaan dadka loo shaqeeyo shaqaalaha.

Mushaharka ugu yar waxaa loo kordhin doonaa:

- $14 saacadii 1da bisha Janaayo, 2018, iyo
- $15 saacadii 1da bisha Janaayo, 2019

| **Qaybaha Mushaharka Ugu Yar** | **Hadda ilaa 31ka, Diseembar. 2017** | **1da, Janaayo, 2018 illaa 31ka, Disembar. 2018** | **1da, Janaayo. 2019 illaa 30ka, Sibtembar. 2019** |
|---|---|---|---|

| | | | |
|---|---|---|---|
| Mushaharka Ugu Yar Ee Guud | $11.60 saacadii | $14.00 saacadii | $15.00 saacadii |
| Ardayda ay da'doodu ka yar tahay 18 sano kuwaas oo shaqeeya wax aan ka badnayn 28 saacadood todobaadkii marka uu dugsigu furan yahay, ama shaqeeya inta lagu guda jiro biririfta dugsiga ama fasaxyada xilliga xagaaga | $10.90 saacadii | $13.15 saacadii | $14.10 saacadii |
| Adeegayaasha Bixiya Khamriga | $10.10 saacadii | $12.20 saacadii | $13.05 saacadii |
| Hageyaasha Kaluumaysiga iyo Ugaarsiga | $58.00<br><br>Sicirka loogu talogalay shaqada la shaqeeyo wax ka yar shan saacadood oo isku xigga maalintii<br><br>$116.00<br><br>Sicirka loogu talogalay in la shaqeeyo shan ama ka baddan oo saacadood maalintii, haddii ay yihiin ama aanan ahaynba saacaduhu kuwo isku xigga | $70.00<br><br>Sicirka loogu talogalay shaqada la shaqeeyo wax ka yar shan saacadood oo isku xigga maalintii<br><br>$140.00<br><br>Sicirka loogu talogalay in la shaqeeyo shan saacadood ama in ka badan maalintii, haddii ay yihiin ama aanan ahaynba saacaduhu kuwo isku xigga | $75.00<br><br>Sicirka loogu talogalay shaqada la shaqeeyo wax ka yar shan saacadood oo isku xigga maalintii<br><br>$150.00<br><br>Sicirka loogu talogalay in la shaqeeyo shan saacadood ama in ka badan maalintii, haddii ay yihiin ama aanan ahaynba saacaduhu kuwo isku xigga |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Dadka ka shaqeeya guriga (shaqaalaha ugu qabta shaqo lacag lagu siiyo ayaga oo jooga gurigooda qofka loo shaqeeyo) | $12.80 saacadii | $15.40 saacadii | $16.50 saacadii |

## Isbedelada lagu sameeyo Heerarka Shaqaalaynta (Employment Standards)

### Lacag bixin loo wada Siman Yahay oo loogu talogalay Sharciyada Shaqada loo wada Siman Yahay: Shaqaalaha Caadiga, Maalin-barkeeda Shaqeeya, Aan Joogtada Ahayn iyo Xilliyeedka

Sharciga cusub wuxuu u baahan doonaa in shaqaalaha caadiga ah, maalinta-barkeeda, aan joogtada ahayn iyo Xilliyeedka ah loo siiyo lacagta si ay isku mid ka yihiin shaqaalaha shaqeeya maalinta oo dhan marka ay si cad uga wada qabanayaan hal shaqo isla qofka loo shaqeeyo.

Qaanuunka cusub wuxuu u oggolaanayaa shaqaalaha in ay codsadaan dib u eegis in lagu sameeyo sicirka mushaharkooda haddii ay aaminsan yihiin in aysan qaadanin mushaharka loo wada siman yahay ee ay qaataan shaqaalaha shaqeeya maalinta oo dhan ama joogtada ah. Qofka loo shaqeeya kadib wuxuu ku khasban yahay in uu uga jawaabo in wax-ka-beddelid lagu sameeyo mushaharka ama in uu bixiyo sharaxaad qoraal ah.

Ka reebitaannada laga reebo shuruuda loogu talogalay mushaharka loo wada siman yahay halkaas oo kala duwanaanshaha mushaharka uu ku saleysan yahay:

- Nidaamka sida loo soo kala horeeyay
- Nidaamka mudnaanta
- Nidaamyada u xadida mushaharka qaabka tayada ama badnaanta wax soo saarka
- Arrimo kale (xaalada nooca qofka iyo shaqada uma qalmaan sida ka reebitaano laga reebo shuruudan)

Qaanuunka cusub sidoo kale wuxuu ka ilaalinayaa shaqaalaha caadiga ah, maalinta-barkeeda, aan joogtada ahayn iyo xilliyeedka cawaaqibta ku saabsan weydiinta waxa ku saabsan sicirka mushaharkooda ama in la weydiiyo shaqaale kale sicirka mushaharkiisa.

Sharcigan waxaa la dhaqan gelinayaa 1da bisha Abriil, 2018.

Sharcigu wuxuu uga baahan yahay Wasiirka Shaqada (Minister of Labour) in uu bilaabo dib-u-eegis lagu sameynayo sharciyada mushaharka ama lacag bixinta loo wada siman yahay ee loogu talogalay shaqaalaha Caadiga ah, Maalin-barkeeda, aan joogtada ahayn iyo Xillliyeedka ah marka ay tahay 1da bisha Abriil, 2021.

**Mushaharka ama Lacag bixinta loo wada Siman yahay ee loogu talogalay Sharciyada Shaqada loo wada Siman yahay: Shaqaalaha Wakaallada Caawimaada Ku-meelgaarka ah**

Xeerka wuxuu uga baahan yahay shaqaalaha Wakaallada Caawimaada Ku-meelgaarka ah (Temporary Help Agency) (THA) (shaqaalaha loo qoondeeyay) in lacagta loo siiyo si ay isku mid ka yihiin shaqaalaha macamiilka Wakaallada Caawimaada Ku-meelgaarka ah marka ay inta badan ay qabanayaan hal shaqo oo isku mid ah.

Qaanuunka wuxuu ka ilaalinayaa shaqaalaha la qoondeeyay cawaaqibta ah in la weydiiyo waxa ku saabsan sicirka mushaharkooda ama sicirka mushaharka shaqaalaha macamiilka.

Sharcigan waxaa la dhaqan gelinayaa 1da bisha Abriil, 2018.

Sharcigu wuxuu uga baahan yahay Wasiirka Shaqada (Minister of Labour) in uu bilaabo dib-u-eegis lagu samaynayo sharciyada mushaharka ama lacag bixinta loo wada siman yahay ee loogu talogalay Shaqaalaha Wakaallada Caawimaada Ku-meelgaarka ah (Temporary Help Agency Employee) marka ay taariikhdu tahay 1da bisha Abriil, 2021.

**Joojinta Shaqada**

Sharcigu wuxuu uga baahan yahay Wakaallada Caawimaada Ku-meelgaarka ah (Temporary Help Agency Employee) in ay siiso shaqaalaha la qoondeeyay ugu yaraan hal toddobaad ogeysiis ah marka shaqo loo jadwaleeyo in ay socoto ugu yaraan muddo ka badan saddex bilood la joojin doono xilli hore.

Haddii aanan la bixinin ogeysiiska halka todobaad ah, shaqaalaha la qoondeeyay waa in ay lacag ku qaataan ogeysiiska bedelka ah, haddii shaqaalaha la qoondeeyay la siiyo ugu yaraan shaqo macquul ah oo u dhiganta halka todobaad mooyaane inta lagu guda jiro muddada ogeysiiska.

Sharcigan waxaa la dhaqan gelinayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

**Jadwalka**

Sharcigu wuxuu samaynayaa xeerarka jawdwalka oocusub:

- Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin in ay codsadaan isbeddelo lagu sameeyo jadwalka ama meesha ka-dib marka ay shaqeeyaan saddex bilood, ayaga oo aan ka cabsanaynin aargoosi.
- Shaqaalaha u shaqeeya si joogta ahi muddo ka badan saddex saacadood maalintii, laakiin kadib markii ay imaadaan shaqada la siiyay wax ka yar saddex saacadood, waa in la siiyo lacagta saddex saacadood oo shaqo ah.
- Shaqaalaha waxay diidi karaan in ay aqbalaan isbeddelada shaqada ayaga oo aan ka cabsanin cawaaqib dambe haddii qofka ay u shaqeeyaan uu ka codsado in ay shaqeeyaan wax ka yar ogeysiiska 96 saacadood.
- Haddii isbedelka shaqada lagu buriyo gudaha 48 saacadood oo ah marka ay bilaabatay, shaqaalaha waa in lacagta lagu siiyaa saddexda saacadood ee ah sicirkooda lacag bixinta caadiga ah.
- Marka ay shaqaaluhu yihiin kuwo "la-waco" oo aanan shaqada looga wicin ama shaqeeya in ka yar saddexda saacadood, waa in la siiyo lacagta saddexda saacadood ee shaqada. Midaan waxay u baahan doontaa muddo 24 saacadood kasta midaas oo shaqaalaha la-waco.
- Sharciga cusub wuxuu bixinayaa muddo kala-guur ah oo lagu sameeyo heshiisyada aruurinta jirta illaa laga gaaro dhicitaankooda xiliga hore ah ama 1da bisha Janaayo, 2020.
- Waxaa jira ka reebitaano badan oo lagu sameeyo shuruudaha jadwalka cusub kuwaas oo ka turjumaya xaalado badan, oo ay ku jirto xaaladaha deg-degga ah iyo hubinta bixinta adeegyada dadweynaha ee aasaasiga ah.

Xeerarkan jadwalka waxay dhaqan gelayaan 1da bisha Janaayo, 2019.

**Lacag bixinta Wakhtiga dheeraadka ah**

Sida waafaqsan sharciga, shaqaalaha uga shaqeeya wax ka badan hal jago qofka loo shaqeeyo kuwaas oo shaqeeya wakhti dheeraad ah waa in lacagtooda lagu siiyaa sicirka loogu talogalay jagada ay ka shaqeeyaan inta lagu guda jiro muddada wakhtiga dheeraadka ah.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

**Kala-saarid La'aanta Shaqaalaha**

Sharciga cusub wuxuu ka reebayaa dadka loo shaqeeyo in ay u kala saari waayaan shaqaalaha sida "qandaraaslayaal madax-banaan" "independent contractors." Tani waxaa loogu talogalay in lagu sheego xaaladaha dadka loo shaqeeyo ay ula dhaqmaan shaqaalahooda si aan habboonayn oo ah sida in ay yihiin iskooda-u-shaqaystayaal oo aan xaq u lahayn ilaalinta Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA).

Xaalada uu dhaco muran ama khilaaf, qofka loo shaqeeyo waa in uu mas'uul ka noqdaa in uu bixiyo ama sheego in qofka uusan *ahayn* shaqaale.

Sharcigan ku saabsan kala saarid la'aanta shaqaalaha wuxuu ku dhaqan galayaa Oggolaansho Boqortooyo (Royal Assent).

### Mas'uuliyada La wadaago ee Dadka Loo Shaqeeyo ee Xiriirka Ka Dhaxeeya

Sharciga cusub wuxuu ka saarayaa sharciga ama qodobka u baahan caddeyn "ujeeddo ama saameyn" "intent or effect" si loo jebiyo u jeeddada Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (Employment Standards Act) ee sannadka 2000 marka la go'aaminayo haddii ganacsiyada leh hawlo xiriir ka dhaxeeya loola dhaqmayo sida hal qof oo loo shaqeeyo oona si wada jir ah mas'uuliyada dusha looga saarayo lacagaha lagu leeyahay hoosta Xeerka.

Luuqadii hore ee ku qornayd Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA) waxay xadiday saameynta sharciyada ama qodobada mas'uuliyada la wadaago. Isbeddelkan wuxuu soo celinayaa ujeedkii asalka ahaa.

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

### Fasaxa Mushaharka Leh

Sharcigu wuxuu hubinayaa in ay shaqaaluhu xaq u leeyihiin fasax saddex toddobaad ah oo mushahar leh kadib marka ay u shaqeeyaan shan sano isla hal qof oo loo shaqeeyo.

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

### Lacag-ixinta Fasaxa Dadweynaha

Xeerka cusub wuxuu fududeynayaa qaacidada loo xisaabo lacag bixinta fasaxa dadweynaha si ay shaqaalaha xaq ugu yeeshaan celceliska mushaharkooda  maalin laha ee joogtada ah.

Sharciga cusub wuxuu uga baahan yahay qofka loo shaqeeyo in uu siiyo shaqaalaha bayaan qoran oo sheegaya macluumaad gaar ah marka maalinta loo beddelo fasaxa dadweynaha.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

## Fasaxa Xaaladaha Deg-degga ah ee Mushaharka Leh

Ka hor Qaanuunka Shaqooyinka Wanaagsan (Better Jobs Act), Goobaha shaqada ee Cadaaladda ah (Fair Workplaces), fasaxa xaaladaha deg-degga ah ee shakhsiyeed (Personal Amergency Leave, PEL) waxaa  kaliya lagu dabakhayaa meelaha shaqada ee ay joogaan 50 shaqaale ama in ka badan. Sida waafaqsan sharciga cusub, xadkan ugu hooseeya waa la baabi'iyay.

Sharciga cusub wuxuu hubinayaa in dhammaan shaqaaluhu ay xaq u leeyihiin ilaa 10 maalmood oo ah kuwa fasaxa xaaladaha deg-degga ah ee shakhsiyeed (PEL) ah sannad kasta, oo ay ku jiraan laba maalmood oo fasaxa xaaladaha deg-degga ah ee shakhsiyeed (PEL) mushahar leh haddii shaqaalaha uu shaqeeyo ugu yaraan hal todobaad. Wuxuu sidoo kale ka reebayaa dadka loo shaqeeya in ay uga baahdaan shaqaalaha in uu bixiyo qoraal jiro ama caafimaad oo laga keeno dhakhtar caafimaad u qalma marka la qaadanayo fasaxa xaaladaha deg-degga ah ee shakhsiyeed.

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

## Fasaxa Sababta u ah Rabsho Galmo ama Guri

Fasax cusub oo ku saabsan rabsho galmo ama guri ayaa la sameeyay.

Shaqaalaha shaqeeyay ugu yaraan 13 todobaad oo isku xigga, sharciga cusub wuxuu siinayaa illaa iyo 10 maalmood oo fasax ah iyo illaa 15 todobaad oo fasaxa la ilaaliyay ah marka shaqaalaha ama ilmahooda ay la kulmaano ama ay ku sugan yihiin hanjabaad rabsho galmo ama guri ah. Shanta maalmoodee ugu horaysa ee fasaxa sannad kalandaariye kasta ayaa la bixinayaa, inta hartayna lama bixinayo.

Sharciga cusub ayaa sidoo kale uga baahan dadka loo shaqeeyo in ay sameeyaan habab lagu ilaalinayo sir ahaanta diiwaanada ay helaan ama sameeyaan ee xiriirka la leh shaqaalaha qaadanaya fasaxa rabshada galmada ama guriga.

Sharciyadan fasaxa waxay dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

**Fasaxa Uurka**

Shaqaalaha ku dhib qaba dhibaato uur, sharciga cusub wuxuu u kordhinayaa dhererka kordhinta muddada la filanayo ee ilaa 17ka-todobaad ee fasaxa ah laga bilaabo 6 toddobaad ilaa 12 toddobaad.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

**Wax-ka-beddelida lagu sameeyo Fasaxyada Loo qaato sida Cawaaqib ka dhalata Isbeddelada Sharciga Federaalka**

**Fasaxa Xanuunka Halista ah**

Ka hor Qaanuunka Shaqooyinka Wanaagsan (Better Jobs Act) Goobaha shaqada Cadaaladda ah (Fair Workplaces), ee 2017 shaqaaluhu waxay qaadan karaan illaa 37 toddobaad si ay u siiyaan daryeel ama taakulayn ilmahooda sida halista ah u xanuunsan.

Hoosta isbeddeladan cusub, shaqaalaha wuxuu xaq u leeyahay in uu ku qaato illaa 17 toddobaad oo fasax ah gudaha muddo 52 toddobaad ah si ay u siiyaan daryeel ama taakulayn xubinka qoyska weyn ee u xanuunsan si halis ah iyo ilaa 37 todobaad si ay u siiyaan daryeel ama taakulayn ilmaha sida halista ah u xanuunsan midkaas oo ah xubin qoyska ka tirsan. Isbeddeladan waxay dhaqan galayaan wixii ka dambeeya 3da bisha Diseembar, 2017 ama Oggolaansho Boqortooyo (Royal Assent).

**Fasaxa Caafimaad Ee Qoyska (Family Medical Leave)**

Sharcigu wuxuu u kordhinayaa Fasaxa Caafimaad Ee Qoyska (Family Medical Leave) laga bilaabo illaa 8 toddobaad oo ah muddo 26-toddobaad ah illaa 28 toddobaad oo ah gudaha muddo 52-todobaad. Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

**Fasaxa loogu talogalay Dhimasho Ilmo iyo Maqnaansho Dembi-La xiriira**

Sharciga wuxuu dejinayaa fasax cusub, oo gooni ah oo loogu talogalay dhimashada ilmo oo ay sabab u tahay wax walba muddo gaaraysa illaa 104 toddobaad. Wax-ka-beddelidyada cusub sidoo kale waxay samaynayaan ama dejinayaan fasax gooni ah oo loogu talogalay

maqnaansho ilmo xiriir la leh-dembi oo ah muddo gaaraysa illaa 104 toddobaad. Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

**Fasaxa Waalidnimo**

Waxaa la kordhiyay fasaxa waalidnimo Markii hore fasaxan wuxuu ahaa illaa 35 toddobaad haddii shaqaalaha uu qaato fasax uur, iyo haddii kale 37 toddobaad. Hoosta sharciga cusub, waxaa la qaadan karaa illaa iyo 61 toddobaad haddii shaqaalaha uu qaato fasaxa uurka, iyo haddii kale illaa 63 toddobaad. Isbedelkan wuxuu u imaanayaa asaga oo ah natiijo ka dhalatay isbeddelada federaalka cusub ee lagu sameeyay Ceymiska Shaqaalaynta (Employment Insurance). Sharciga wuxuu dhaqan galayaa wixii ka dambeeya 3da bisha Diseembar, 2017 ama Oggolaansho Boqortooyo (Royal Assent).

**Amarada loogu Bixinayo si Toos ah Shaqaalaha**

Qaanuunka cusub sidoo kale wuxuu u oggolaanayaa Shaqaalaha Heerarka Shaqaalaynta (Employment Standards Officers) in ay amar ku bixiyaan in lacagta si toos ah loo siiyo shaqaalaha marka shaqaalaha ama macamiilka Wakaallada Caawimaada Ku-meelgaarka ah (Temporary Help Agency) uu lacag ku leeyahay shaqaalahaasi.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

**Xiriirka Shaqaalaha**

Sharcigu ugama baahna shaqaalaha in ay la xiriiraan qofka ay u shaqeeyaan ka hor inta aysan ku dirin sheegashooyinka hoosta Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (Employment Standards Act) (ESA).

Agaasimaha Heerarka Shaqaalaynta (The Director of Employment Standards) ma diidi karo in uu u xilsaaro Shaqaalaha Heerarka Shaqaalaynta (Employment Standards Officer) si uu baaritaan ugu sameeyo sheegashada Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA) midaas oo ay sabab u tahay macluumaad aan dhammaystirnayn oo ka ahaatay dhinaca dacwoodaha.

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

**Ciqaabta loogu talogalay U hoggaansanaan-La'aanta loo hoggaansami waayo Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA)**

Sharciga wuxuu kordhinayaa dabacsanaanta lagu bed-bedeli karo maamulka ciqaabta lacageed midaas oo laga samayn karo dhinaca xeerarka loogu talogalay dadka loo shaqeeyo kuwaas oo aanan u hoggaansamin Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA).

Dowlada sidoo kale waxay ku talo jirtaa in ay bedesho xeerka hoos yimaada Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA) si loogu kordhiyo maamulka ciqaabta lacageed ee ugu baddan ee loogu talogalay dadka loo shaqeeyo ee aanan-u hoggaansamin laga bilaabo $250, $500, iyo $1000 illaa $350, $700, iyo $1500, sida ay isugu xigaan.

Sharciga cusub wuxuu u oggolaanayaa Agaasimaha Heerarka Shaqaalaynta (the Director of Employment Standards) in uu ku daabaco ama qoro (oo ay ku jirto online-ka) magacyada dadka lagu soo rogay ciqaabta, sharaxaad ku saabsan ku xad gudbida, taariikhda xad gudubka iyo cadadka tirada ee ciqaabta.

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

**Faa'iidada ku saabsan Mushaharka Aan la bixinin**

Sharcigu wuxuu u oggolaanayaa Shaqaalaha Heerarka Shaqaalaynta (Employment Standards Officers) si ay ugu abaal-mariyaan shaqaalaha mushaharka aanan la bixinin iyo lacagaha sida sharci darada ahi loogu soo oogay shaqaalaha.

Agaasimaha Heerarka Shaqaalaynta (The Director of Employment Standards) waxaa loo oggolaan doonaa, ayada oo ay la socoto oggolaanshaha Wasiirka, si loo xadido sicirada faa'iidada loogu talogalay cadadka lagu leeyahay hoosta sharciyada kala duwan ee Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA).

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

## Aruurin

Isbeddelada cusub waxay wanaajinayaan aruurinta mushaharka ay samayso dowlada ama soo aruuriyaha la oggolaaday, oo ay ku jirto:

- U oggolaanshaha loo oggolaado soo aruuriyaha laga oggolaaday dhinaca Agaasimaha Heerarka Shaqaalaynta (the Director of Employment Standards) in uu soo saaro amaro, dammaanado lagu sameeyo hanti dhab ah ama shakhsiyeed iyo in ammaan laga dhigo marka qorshaha lacag bixintu ay socoto
- U oggolaanaya dowlada iyo soo aruuriyaha la oggolaaday in ay isku sheegaan ayaga dhexdooda macluumaadka midaas oo ay sabab u tahay ujeedo aruurin lagu sameeyo cadadka lacagta lagu bixin karo hoosta Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA)

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

## Heshiisyada Elektarooniga ah

Isebedelada cusub waxay caddeynayaan in heshiisyada elektarooniga ah ee u dhaxeeya dadka loo shaqeeyo iyo shaqaalaha, sida heshiiska loogu shaqaynayo saacado dheeraad ah, waxay noqon karaan sida heshiis qaab qoraal ah.

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.

## Ka reebitaanada

Hoosta sharciga cusub:

- Ku dhowaadkii dhammaan shuruudaha jira ee Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA) iyo xaq u yeelashada waxay khuseeyaan shaqaalaha Taajka (Crown employees). Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.
- Dhammaan shuruudaha Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA) iyo xaq u yeelashada waxay khuseeyaan dadka ka qaadanaya tababarka loogu talogalay shaqada tooska qofka ay u shaqeeyaan. Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2018.
- Dadka u shaqeeya sida qayb ka mid ah barnaamijka barashada khibrada midkaas oo ay qabato kulliyad shaqo khaas ah waxaa laga saarayaa shuruudaha iyo xaq u yeelashada hoos yimaada Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA), si la mid ah barnaamijyada ay qabtaan jaamacadaha, kulliyadaha ama dugsiyada sare.
- Ardayda shaqeysa oona u shaqeeya si joogta ah wax ka badan saddex saacadood waa in lacagta loogu bixiyaa ugu yaraan saddex saacadood xitaa haddii ay shaqeeyaan wax ka yar saddex saacadood. Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2019.
- Dhammaan shuruudaha iyo xaq u yeelashada Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA) waxay khuseeyaan shaqaalaha ku shaqeeya matalaad ah ama ku shaqeeya deegaan ayaga lagu dhaqan celinayo (guud ahaan loo yaqaano sida "aqoon

isweydaarsi la ilaaliyay" "sheltered workshop"). Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha Janaayo, 2019.

- Wasaarada Shaqada (Ministry of Labour) waxay hadda qabanaysaa la-talin ku saabsan ka reebitaanada Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA) iyo xeerarka khaaska ah ee warshada sidoo kale ka reebitaanada (LRA). Dib-u-eegistan waxaa ka mid ah ka reebitaano ku saabsan booska maamulayaasha iyo horjoogayaasha. Warka ku saabsan la-talintan waxaa lagu soo qori doonaa bogga internetka Wasaarada Shaqada (Ministry of Labour). Wax baddan ka oggoow halkan.

## Isbedelada lagu sameeyo Qaanuunka Xiriirada Shaqada (Labour Relations Act)

### Shahaadada Ururka

Sharciga cusub wuxuu:

- Dejin doonaa shahaado urur ku salaysan-kaarka midkaas oo lagu helo adeegyada dhismaha warshada, adeegyada warshada bulshada iyo daryeelka guriga iyo warshada wakaallada caawimaada ku-meelgaarka ah.
- Ku samayn doonaa isbedeladaan soo socda habka shahaadada ururka:
- La yareeyo shuruudaha gaar ee loogu talogalay sixida shahaadada ururka, midaas oo u oggolaanaysa ururada in ay si fudud ugu helaan shahaado marka qofka loo shaqeeyo uu ku lug leeyahay dhaqan xumo kasoo horjeeda qaanuunka xiriirada shaqada (LRA).
- Uga dhigayaa in si fudud lagu helo heshiisiinta qandaraaska ugu horeeya, sidoo kale wuxuu ku darayaa waxyaabaha ay ka kooban tahay dhex-dhexaadinta guud hawsha.
- Uga baahan yahay Guddiga Xiriirada Shaqada Ontario (Ontario Labour Relations Board) (OLRB) in uu sheego codsashooyinka heshiisiinta-dhex-dhexaadinta qandaraaska ugu horeeya ka hor inta aanan wax laga qabanin ka saarida iyo shahaado ka qaadista.
- U oggolaanaya ururada in ay galaan liisaska shaqaalaha iyo macluumaad xiriir gaar ah oo la siiyay ururka kuwaas oo caddeyn kara in mar hore la gaaray taakulaynta boqolkiiba 20 oo shaqaalaha ah ee ku saabsan gor-gortanka qaybta la soo jeediyay. Isticmaalka liiskan wuxuu u hoggaansan yahay shuruudaha iyo xadadka iyo dhammaan tallaabooyinka macquulka ah ee ay khasabka tahay in la qaato si loo ilaaliyo ammaanka iyo sir ahaanta liiska.
- Si cad loo xoojiyo Guddiga Xiriirada Shaqada Ontario (OLRB) si loo sameeyo codadka ka baxsan meesha shaqada, ay ku jirto qaab elektaroonig iyo qaab teleefoon ah.

- La xoojiyo Guddiga Xiriirada Shaqada Ontario (OLRB) (iyo Shaqaalaha Xiriirada Shaqada (Labour Relations Officers) haddii laga oggolaado dhinaca Guddiga Xiriirada Shaqada Ontario (OLRB) si loo bixiyo tilmaamo xiriir la leh hawsha codeynta iyo nidaaminta codeynta si loo hubsado dhex-dhexaadka hawsha codeynta.

### Xuquuqaha Xil-lawareegaha

Sharciga cusub wuxuu u sii dheeraynayaa xuquuqaha xil-lawareegaha dib-u soo noqoshada dhisidda adeegyada qandaraasyadaa.

Qaanuunka sidoo kale wuxuu u oggolaanayaa dowlada in ay ku dabakhdo xuquuqaha xil-lawareegaha, qaab xeer ah, noocyo kale oo adeeg bixiyayaal ah kuwaas oo qaata lacagaha dadweynaha.

### Qaab-dhismeedka Qaybaha Gor-gortanka

Isbedeladu waxay u oggolaanayaan Guddiga Xiriirada Shaqada Ontario (OLRB) in uu dib-u-eegis ku sameeyo qaab-dhismeedka qaybaha gor-gortanka ee ku saabsan daruufaha qaarkood iyo in lagu daro qaybta gor-gortanka wakhtiga dhow shahaadada qaadatay ama la rukhsadeeyay qaybaha kale ee gor-gortanka ee ah isla qofka loo shaqeeyo, halka qaybahan looga matalo isla wakiilka gor-gortanka. Guddiga Xiriirada Shaqada Ontario (OLRB) sidoo kale waxaa loo oggolaan doonaa in uu sameeyo amaro kale oo xiriir la leh. Isbedelada sidoo kale waxay u oggolaanayaan qaybaha in ay si wada jir ahi u oggolaadaan in dib-u-eegis lagu sameeyo qaab-dhismeedka qaybaha gor-gortanka wakhti kasta. Ayada oo la raacayo dib-u-eegistaas, qaybaha waxay samayn karaan codsi wada jir ah oo loogu talogalay oggolaanshaha Guddiga si la isugu daro qaybaha gor-gortanka oona loo sameeyo isbedelada xiriirka la leh.

### Xuquuqaha Ku-soo-noqoshaqada-Shaqada iyo Hababka Hawsha

Markii hore qaanuunka xiriirada shaqada (LRA) waxay u siisay shaqaalaha xuquuqda, hoos timaada shuruudo gaar ah, in ay dib ugu soo noqdaan shaqada gudaha lix bilood ee laga joogo bilaabida shaqo joojinta sharciga ah. Sharciga cusub wuxuu saarayaa xadka lixda-bilood ah.

Sharciga cusub ama qodobka cusub sidoo kale wuxuu uga baahan yahay qofka loo shaqeeyo in uu dib uu meeleeyo shaqaalaha kadib dhammaadka shaqo joojin sharci ah ama eryo (ayada

oo ay u hoggaansan tahay shuruudo ama xaalado gaar ah), iyo in uu bixiyo helida heshiisiin cabasho loogu talogalay fullinta waajibkaasi.

### Ilaalinta (Just Cause)

Sharciga cusub wuxuu ka ilaalinayaa shaqaalaha ku jira qaybta gor-gortanka in la edbiyo ama looga saaro shaqada kaliya (just cause) midaas oo uu sameeyo qofka ayaga u shaqeeya inta lagu guda jiro muddada u dhaxaysa shahaado siinta iyo taariikhda qandaraaska ugu horeeya la geliyo gudaha (ama taariikhda aanan ururka matalin shaqaalaha), iyo inta lagu guda jiro muddada u dhaxaysa taariikhda shaqaaluhu ay ku jiraan shaqo joojinta sharciga ah ama boos ka-saarid iyo taariikhda heshiis wada jir ah oo cusub la geliyo gudaha (ama taariikhda aanan ururka shaqaalaha).

### Ganaaxyada

Sharciga cusub wuxuu ugu kordhinayaa ganaaxyada ugu baddan hoosta Qaanuunka Xiriirada Shaqada (Labour Relations Act) illaa $5,000 taas oo laga qaado shakhsiyaadka iyo $100,000 oo laga qaado ururada (markii hore ganaaxyadaan waxay ahaan jireen $2,000 oo laga qaado shakhsiyaadka iyo $25,000 oo laga qaado ururada).

### Waxaa la Fullinayaa

Dhammaan xiriirada shaqada la soo jeediyay waxaa la dhaqan gelinayaa dabaqaayada 1da bisha Janaayo, 2018 ama maalinta Qaanuunka uu helo Oggolaansho Boqortooyo (Royal Assent).

### Isbedelada lagu sameeyo Qaanuunka Ammaanka iyo Caafimaadka Shaqada (Occupational Health and Safety Act)

Sharciga cusub wuxuu ka reebayaa dadka loo shaqeeyo in ay uga baahdaan shaqaalaha in uu ku xirto cag gashi leh cirib dheer (waxaa loola jeedaa, kabaha ciribta dhaadheer) meesha shaqada, aan ka ahayn haddii kabahaasi cagta lagu xiranayo loogu baahan yahay si loo ilaaliyo ammaanka shaqaalaha.

Waxaa jira ka reebid khuseysa shaqaalaha qabanaya hawlaha madadaalada iyo xayaysiinta warshada.

Isbedelkaan wuxuu ku dhaqan galayaa Oggolaansho Boqortooyo (Royal Assent).

**Kor u qaadista Fullinta Jaangooyooyinka Shaqo**

Gobolka wuxuu qorshaynayaa in uu shaqaaleeyo illaa 175 shaqaale oo ah saraakiisha jaangooyooyinka shaqo oo dheeraad ah wuxuuna soo saaray Barnaamijka Waxbarashada iyo Tababarka ee Heerarka Shaqaalaynta (Employment Standards Training and Education Program) si loo barro dhammaan shaqaalaha iyo ganacsatada leh shaqo-dhex-dhexaad ah oo yar waxa ku saabsan xuquuqaha iyo waajibaadka hoos yimaada Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta, ee sannadka 2000 (Employment Standards Act, 2000). Waxbarashadu waxay ku caawinaysaa shaqaalaha in ay fahmaan waajibaadkooda.

Marka la shaqaalaysiiyo shaqaalaha heerarka shaqaalaynta cusub, marka la gaaro 2020-2021, barnaamijka Heerarka Shaqaalaynta (Employment Standards) wuxuu ku xalin doonaa dhammaan sheegashooyinka la soo diray gudaha 90 maalmood wuxuuna baaritaan ku samaynayaa 1 iyo 10 meelaha shaqada Ontario ah. Intaas waxaa sii dheer, barnaamijka wuxuu bixin doonaa caawimaad u hoggaansanaan midaas oo si gaar ah loo siiyo dadka loo shaqeeyo ee cusub ayada oona diirada la saarayo ganacsatada leh shaqo-dhex-dhexaad ah oo yar. Midaan waxay ku caawin doontaa dadka shaqada iska leh ee wanaagsan in ay fahmaan waajibaadkooda.

Fullinta waxay diirada saari doontaa dadka shaqada iska leh kuwaas oo u tar-tamay si aan cadaalad ahayn ayaga oo jebinaya sharciga, waxayna tartanka u simayaan aqlabiyadda dadka loo shaqeeyo ee raaca xeerarka.

Fullinta la kordhiyay waxay u jeeddadeedu noqon doontaa in lagu dhiirageliyo u hoggaansanaanta oona lagu celiyo-u hoggaansanaan la'aanta. Midaan waxay u baahantahay xogag ku saabsan fullin iyo waxbarasho si loo saameeyo dabeecada qofka shaqada iska leh loona celiyo ama joojiyo ku xad-gudub dhici kara.

Xogagaan cusub waxay dad ku caawin doonaan in la adkeeyo in isbedelada sharciyeed ee cusub ee lagu sameeyay Qaanuunka Heerarka Shaqaalaynta (ESA) loogu fulliyo sida ugu buuxda oona waxtarka ugu leh.

**Janet Deline** Communications Branch
Wixii ku saabsan kaliya su'aalaha warbaahinta:
MOLMedialine@ontario.ca
416-326-7405
**Michael Speers** Minister’s Office
416-325-6955

Laga helo Online-ka
Disponible en Français